GOLAHA SAMATABIXINTA
AW-DIGIL

AW-DIGIL
RESCUE COUNCIL

E-mail: awdigilrescuecouncil@gmail.com

Taariikh: 25 Juun 2023

Tixraac: GSAD/GS/23/011

BAYAAN KA SOO BAXAY GOLAHA SAMATABIXINTA AW-DIGIL

Ujeedo: <u>Arimaha Gobolka Shabeelaha Hoose</u>

Maanta oo ah 25 Juun 2023 waxa ay ku beegan sanadguuradii 4aad ee aasaaska Golaha Samatabixinta Aw-Digil. Aniga oo ah Mr. Ahmed Mohamed Luqmaan kuna hadlaaya marka hore kan magaca Gudoomiyaha Gudiga Saree e Golaha Samatabxinta Aw-Digil iyo magaceygaba, waxa aan halkaan hambalyo ugu dirayaa dhammaan xubnaha ka tirsan Golaha Samatabixinta Aw-Digil iyo dhammaan bulshoweynta aan metelno meelkaso oo ay joogaan, waxaan leeyahay sanadguuro wacan. Ujeedooyinkii loo aaasaasay Golaha Samatabixinta Aw-Digil waxa ay tahay in uu noqdo cod u ololeeya ama ka shaqeeya arimaha xuquuqda bani'aadamka, arimaha caddaaladda, maamulwanaagga iyo horumarinta ee bulshada Digil meel walbo oo ay ku noolyihiin dunida gaar ahaan Soomaaliya.

Marka hore, aniga oo oo ka faa'iideysanaayo fursaddaan waxaan halkaan kaga hadlayaa arimihii ugu dambeeyay ee ka soo cusboonaaday degmada Baraawe, ee caasimadda DGKGS. Waxaan camaabreyneyanaa dhibaatadii ka dhacday deegaankaas taariikhdu markay aheyd 12/06/2023 oo sababtay dhimasho iyo dhawacyo kala duwan. Waxaan kaloo cambaareyneynaa in dad odoyaal qaab masuuliyadd xummo ah iyo xilkasnimodarri ku jirto uga hadlay arimaha deegaanka Shabeelaha hoose. Baraawe waa caasimadda Dolwadgoboleedka KGS, waxaana masuulliyadeeda iyo maamulkeeda guud iska leh DGKGS iyo dadka deegaanka. Waxaan halkaan ku cadeneynaa in gobolka Shabeelaha Hoose in uu yahay deegaan qadiimi ah oo aan maanta la helin. Waxaan kaloo halkaan ku xuseynaa in dadka deegeenka aysan wax colaad ah aysan ka dhaxeynin iyo deriskoodaba. Dadka deegaanka iyo beelaha deriska ay yihiin dad beeraley, xoolo dhaqto iyo ganacsato oo markasta isu baahan. Laakiin waxaa jira dad aan deegaanka aheyn oo dhaqan ka dhigtay bood iyo dhac kuwaas oo ku hamiya maanta oo la joogo sanadka 2023 in ay sameeyaan khariidad cusub iyo isbaheysi qabyaalad ku dhisan. Arintaasina waa mid dadka deegaanka aysan marnaba aqbali doonin. Markastana dadka deegaanka waxa ay u taagnaan doonaan in ay difaacdaan sharaftooda, deegaankooda, beerahooda iyo dhulkooda. Waxaana ugu baaqaynaa dadka caqliga u saaxiibka ah in ay ka fogaadaan dadka fitnada wada iyo waxyaabaha laga xishooda ee ku dhisan jaahilnimo iyo diinxumo ay ka dhex wada bulshada dhexdeedda.

Waxaan kaloo hakaan kaga hadleyaa qaar ka mid ah arimaha cakiran ee deegaannada KGS, gaar ahaan waxaa uu Goluhu halkaan ku iftiiminayaa in ay jiraan dhibaatooyin dhinacyo badan taabanaayo oo heysta bulshada ku dhaqan Gobolka Shabeelaha hoose, arimahaasna waxaa ka mid ah:

- In dadka deegaanka Shabeelaha hoose lagu haayo hor istaag ah in ay awood u yeeshaan ka qeybgalka maamulwanagga deegaankooda. Sida in ay si hufan u maamulaan deegaankooda ay ka soo jeedaan. Tusaale ahaan, in dadka asal ahaan ka soo jeeda Gobolka Shabeelha hoose in aan loo dhisin ciidan booliis/daraawiish habeysan ama awood buuxda u leh suggidda nabadgalyada deegaankooda.

- In aan saraakiisha iyo ciidamada Dowladda Federalka Soomaaliya ka soo jeeda ee ku sugan gobolka Shabeelaha hoose in lag keeno gobolo kale ee dalka Soomaaliya. Kuwaas oo dadkii deegaanka ka dhigay kuwo ay adagtahay in dhibaatooyinka nabadgelyo xumo ee ka dhaca gobolka ay ku soo noqnoqdaan. Welibana ciidankaas oo intooda badan ah kuwa ka soo jeedo beelo isku heyb ah, taas oo adkaaneysa in ay sugaan nabadgalyada islamarkaasna ay kalsooni ka helaan dadka deegaanka. Arintaana waxa ay dhaawac ku tahay qaranimada iyo dowladnimada Soomaaliya.

- Isbaarooyinka ay dhigteen ciidamo ku labisan direeska Dowladda Federal Soomaaliya iyo kuwo beeleedyo ka soo jeeda gobollo kale. Kuwaas oo ka ursada deegaannada Shabeellaha hoose dhaqaale aad u farabada oo shaqsiyaad gaar ah ay gacanta u gasho dhaqaalahaas. Dhaqaalahaas la ururiyo in aan wax loogu qaban dadka deegaanka ama lagu xallin arimaha adeegga bulshada.

- In gobolka uu san helin wax horumar muuuqda dhinaca waxbarashada, caafimaadka, hurumarinta beeraha, xoolaha iyo wadooyinka. Dadka deegaanka intooda badan waxaa loo owday xeryo berakacaal ama waxa ay u barakaceen gobollo kale ee dalka Soomaaliya.

- In dad shacab ah ay ku dhinteen shaqooyinka ciidamada ATMIS ee gobolka iyo walxaha qaraxa kuwaas oo la tuhunsanyahay in ay tuureen ATMIS. Gaar ahaa, deegaannada Buulomareer, Golweyn, Awdheegle, Toortoorow, Qoryooley , Jannaalle, iyo toolooyinka qaar ee ku yaalla Shabeelah hoose. Kuwii ugu dambeeyeyna ay ku dhinteen caruur gaareysa 28 deegaan u dhaxeeya Qoryooley iyo Janaalle. Waxaase aad uga xumahay in aanan maqal ama arag in dhacdooyinkaas xanuunka badan in aysan ka hadlin Dowladda Federalka Somaaliya iyo tan Maamulgoboleedka KGS. Arintaas oo u muuqata in shacabka Shabeelha hoose uusan laheyn wax dowlad ah oo difaaca dadka shacabka iyo hantidooda.

- In fariimo ku saabsan dhibaatooyinka ka jira deegaannada Shabeelaha hoose in aan u dirnay Madaxweynaha Dowlad Gobleedka KGS iyo Madaxweynaha Dowladda Federalka Soomaaliya, nasiibdarro in aanan waxbo laga qaban cabashooyinka aan gudbinay.

- In iskahormimaadyo beeleed ay ka dhaceen deegaanka Wanlweyn ee Gobolka Shabeelaha Hoose, hase yeeshee dhibaayinka halkaas ka dhacana ay wadaan maleeshiyooyin ka soo duulay

deegaano kale oo ka baxsan Gobolka Shabeelaha hoose. Iyaga oo ka dhex abuuro colaad dadka deegaanka u degenaa si nabad ah muddo badan. Waxaana jirta in wadooyinka deegaanka Wanlaweyn in ay isbaaro dhigtaan ciidamo wata dareeska dowladda. Dhacdii ugu dambeysay qiyas habeenimadii 16-06-2023 waxaa wadada logu dilay Gud. Arimaha Bulshada ee Wanlaweyn Mr. Haashim Maxamed. Waxaana sida la sheegay dilay ciidamo wata dareeska dowladda. Waxaa kaloo jiray dad sheegtay dilka gudoomiyaha, oo ilaa iyo maanta aan jirin cid loo xiray, xataa ka hadashey dilka gudoomiyaha. Dhammaan dhibaatooyinka ka dhaca deegaanka Wanlaweyn ma jjiro cid wax ka qabata ama ka hadasha.

Baaq Iyo Codsi

Golaha Samatabixinta Aw-Digil waxa uu ku baaqayaa ama codsanayaa arimaha hoos ku qoran:

1) Waxaan ka codsaneynaa in Madaxweynaha DGKG Mudane Cabdulcasiis Xassan Maxamed in ciidamo darawiish ah oo habeysan oo ka soo jeeda dadka asal ahaan dadka deegaanka Shabeelaha Hoose in laga sameeyo dhamman degmooyinka Gobolka Shabeellaha Hoose ee uu maamulka gacanta ku hayo.
2) Madaxwenaha DFS, Mudane Hassan Sheikh Maxaamuud waxaan ka cosdaneynaa in saraakiisha iyo ciidamada Dowladda Federalka Soomaaliya ee ku sugan deegaanka Shabeelaha hoose in dib u eegis lagu sameeyo. Sida, in ciidan isku dhaf ah in la keeno gobolka Shabeelaha hoose lagana qeybgeliyo saraakiisha ciidanka iyo ciidankaba dadka deegaanka Shabeelaha Hoose. Si ciidanka uu u noqdo ciidan qaran, islamarkaasna uu u helo kalsoonida deegaanka.
3) In Wasaaradda Maaliyaddda Dowladd Goboleedk KGS, Wasaaradda Arimaha Gudaha/Dibuheshiisiinta DGKGS iyo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowladda Federalka Soomaaliya in ay wax ka qabtaan canshuuraha sida qaldan loo ururiyo iyo isbaarooyinka lagu ururiyo canshuurta oo aan dadka deegaanka waxbo loogu qaban.
4) In ciidanka ATMIS, xafiiska UNSOM iyo Safaaradda Mareykana ay ku sameeyaan baaritaan madaxbanaan dhibaatooyinka ay geesteen ciidanka ATMIS iyo diyaaradaha Mareykana isla markaasna la siiyo maqdhow eheladii dhammaan dadkii ku dhintay iyo kuwii ku dhaawacmay duqeymihii ay geesteen ATMIS iyo duqeymaha diyaaradaha daroonayaalka ee si qaldan marmar u duqeeya goobaha shacabka ee Gobolka Shabeelaha Hoose
5) Waxaan ugu dambeyn ugu baaqeynaa Dowladda Federalka Soomaaliya, Dowladgobeedka KGS, wakiilka Qaramada Midoobay, safaaradaha USA, UK iyo EU ee Soomaaliya iyo dhammaan hey'adaha u dooda xuquuda bani'aadamka in ay indho gaar ah ku fiiriyaan xaaladda shacabka Gobolka Shabeelaha hoose, si wax loogu qabto arimaha maamulwanaagga, caddaaaladda, hurmarinta iyo sidii gargaarka loo fidiyo dadka deegaanka Shabeelaha hoose in uu u gaari lahaa dadkii iyo goobtii loogu talagalay.

Mahadsanidiin.

Axmed Maxamed Luqmaan
Gudoomiyaha Gudiga Sare ee Golaha Samatabixinta Aw-Digil
E-mail: awdigilrescuecouncil@gmail.com